



# Warar dheeraad ah ku saabsan raadinta Guddoomiye Waxbarasho

Ka socota: Julie Brim-Edwards, Guddoomiyaha, Guddidii Loo Xilsaaray Raadinta Guddoomiyaha Waxbarashada

Taariikhdu markay ahayd Maayo 26<sup>keedii</sup> waxaa kulmay Guddidii Loo Xilsaaray inay soo raadiyaan Guddoomiye Waxbarasho oo la shaqaaleysiyo iyagoo ka wada hadlay arrimahan soo socda: shaqada Guddida; waxqabadka shirkada shaqaaleysiinta; warbixnta hoggaaminta iyo faahfaahinta booska shaqada, shuruudaha heshiiska; waqtiga; doorka xubnaha golaha waxbarashada(kan hadda iyo kuwa imanayaba) ee shaqo qorista iyo shaqaaleysiinta; iyo la kulanka musharaxiinta booska ee mustaqbalka.

Shaqada guddidu waa inay ka soo talo-bixiyaan habkii lagu shaqaaleysiin lahaa guddoomiye waxbarasho oo hawlara isla markaana guuleysta. Dhinaca waqtiga, talo-soo-jeedintu waxay tahay in loo riixo ilaa dhammaadka sanad-dugsiyeedka iyada oo la soo dhammeystiray kulanadii muhiimka ahaa ee bulshada iyo hawlihii gogol-xaadhka ahaaba.

Waxaan wada hadal ballaaran ka yeelanay oo ku saabsan waxqabadka shirkadu ku raadinayo iyo meelaha nidaamku ka jilicsan yahay ama meelaha uu ku fiican yahay, waxana ka mid ah arrimihii gaarka ahaa ee sababay in dhawaan la joojiyo nidaamkii shaqaaleysiin lahaa ee lagu soo xushay xubintii lagu dhawaaqay inay ku guuleystay. Arrimaha kale ee aan ka wada hadalnay waxaa ka mid ahaa waqtiyeynta iyo in la siiyo baaritaan ku filan laguna hubiyo taariikh nololeedkiisii hore qofka shaqada loo xulanayo, in uu ku haboon yahay in loo shaqaaleysiyo bulshada, kartida musharaxiinta shaqada u sharaxan, iyo iyada oo aanu jirin shuruudihii heshiishka ee la isku raaci lahaa ka hor inta aan la magacaabin qofkii ka soo baxay musharaxiinta. Dib u habeyn baa lagu sameyn doonaa nidaamka si wax looga qabto galdaalooloyinkii nidaamka.

Waxaa dib u eegis iyo dib u habeyn lagu sameeyey sharaxaada booska shaqada hadda si loo caddeeyo ta'yada hoggaamineed ee laga maarmaanka u ah guddida golaha waxbarashada. Rita Moore, Mike Rosen, iyo Julie Esparza Brown waxa ay talo-bixin ka sameyn doonan dib u habeynta. Sidoo kale warbixinta hoggaanku wuxuu u baahan doonaa in dardar cusub la galiyo oo lagu kordhiyo sadarka ballanqaadka maalgalinta iyo golaha waxbarashada ee waqtiga kala guurka. Waxa kale oo u baahan in dib loo habeeyo shuruudaha magdhowga iyo isbarbardhiga maclumaaadka degmada heer gobol iyo heer qaran labadaba oo la ururin doono si loo wargeliyo heerka shuruudaha magdhowga xuquuqda ee la go'aamiyey.

Guddidu waxay dib u xaqijiyeen rabitaankooda ah in xubin kasta oo ka mid ah Golaha Waxbarashadu soo jeediyo talo bixinta musharaxiinta uu tixgalinta siinayo, kulanka wareysiga iyo ka qeybgal xoogan doorashada iyo shaqaaleysiinta qofka ka soo dhex baxay musharaxiintii jagada u tartamayey.

Tallaabada labaad: Kulan shaqeedka maanta (Juune 1<sup>deeda</sup>) ee ay wada yeelanayaan xubnihii golaha waxbarashada ee hore iyo kuwan cusub ee imanaya.

Xubnaha guddida golaha ee haddu waa Amy Kohnstamm, Julie Esparza Brown iyo Xubnaha golaha hadda loo doortay ee Rita Moore, Julia Brim-Edwards, iyo Scott Bailey. Intaas waxaa dheer,Xubnaha Golaha ee Paul Anthony iyo Mike Rosen waxay ka qeybqaateen wada hadalada.